التقرير الشهري (4)

مركز الصومال للبحوث ودراسة السياسات
SOMALIA CENTER FOR RESEARCH AND POLICY STUDIES

ثغرات في مشروع
قانون الانتخاب الصومالي الجديد
"توضيحات وتوصيات"

مايو 2019م

طاهر محمد علي

Cilladaha Hindise-sharciyeedka Doorashooyinka Qaranka ee Soomaaliya

Gogoldhig

Ka dib xilligii ku meel gaar ka oo bilaawday 2000 oo jiitamayay 12 sano ayaa waxaa la soo afmeeray 2012, waxaa la sameeyay Dastuur kmg ah, waxaana lagu doortay Muqdisho Madexweyne Xasan Sheekh Maxmuud 42 sano ka dib doorashidii Cabdirashiid Cali Sharmarke 1967 dii, wuxuuna dajiyay Hiigsigii 2016 wuxuuna balan qaaday qabasho Doorasho Guud taas oo suurgaliwayday, badalkeediina waxaa la qabtay doorashooyin dadban oo ergooyin ay soo doorteen xildhibaanada Aqalka Shacabka halka xildhibaanada Aqalka sare ay soo doorteen Baarlamaanadda Dowlad Goboleedyada. Manta halkii oo kale ayay maraysaa oo

waxaa la isku haystaa qaabka doorasho, iyadoo Sahacabka Soomaaliyeed iyo beesha caalamkuba ay garaowsanyihiin in ay adagtahay qabasho doorshooyin guud Daraasaddaam waxay ka koobantahay qaybaha soo socda:

1) Horudhac
2) Sharaxaad kooban Hindisa Sharciyeedka
3) Sooyaalka taariikheed ee shuruucda Doorashooyinka Soomaaliya .
4) Shuruucda xiriirka la leh hindise-sharciyeedka Doorashooyinka qaranka.
5) Ilaa intee ayuu hindise-sharciyeedku waafaqsan yahay Dastuurka KMG JFS.
6) Hindise-sharciyeedku ma leeyahay tayadii sharci ee loo baahnaa.
7) Saameeyska siyaasadeed ee Hindisa Sharciyeedka.
8) Gunaanad.
9) Talooyin.
10) Tixraacyada

1- Horudhac

Golaha Wasiirada Federaalka Soomaaliya ayaa ansixiyay Hindise- sharciyeedka Doorashooyinka Qaranka 2/5/2019, waxaana loo gudbin doonaa labada aqal ee uu ka kooban yahay Barlamaanka Federalka Soomaaliya si ay sidiisa ku anxiyaan, wax-ka-badal ku sameeyaan ama ay Golaha Wasiirada ku soo celiyaan.

Waxaa muuqata in curinta Sharciga Doorashooyinka Qaranka uu ku soo beegmay xilli aad loogu baahan yahay sababtoo ah waa sharcigii lagu hagi lahaa Doorashooyinka Qaranka ee nagu soo fool leh 2021, haddii si kale loo dhaho, sharciga doorashooyinku wuxuu ka mid yahay shuruucda mudnaanta leh ee laga sugaayay in ay xukumaddu curiso laba aqalna meel-mariyaan si loogu nidaamiyo looguna hago Doorashooyinka Qaranka ee 2021.

Haddaba qormadaan waxay ka jawaabaysaa dhowr su'aalood oo ay ka mid yihiin kuwan hoos ku qoran:

- Hindise-sharciyeedka Doorashooyinka ee Golaha Wasiiradu ansixiyeen ma waafaqsan yahay Dastuurka Federaalka ee sida KMG loo ansixiyay ?
- Waa maxay cilladaha ugu waawayn ee hindise-sharciyeedku leeyahay?
- Hindise-sharciyeedkaan ma leeyahay tayadii sharci ee loo baahnaa?

Haddii alle idmo Waxaan isku dayi doonaa in aan si kooban u dul istaagnno qayb walba oo ka mid ah qaybahaan aan soo sheegnay.

2- Sharaxaad kooban Hindisa Sharciyeedka

Hindisa Sharciyeedka waxaa diyaarisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo dib u heshiisiinta, Hindisuhu wuxuu ka kooban yahay toddoba cutub iyo 61 qodob. Cutubka I waa Qodobo Guud sharaxaya shuruudaha aasaasiga, ujeeddada, baaxadda sharciga. Cutubka II wuxuu ka hadlayaa maamulka doorashada, awoodaha iyo waajibaadka Guddiga Qaranka Madax Bannaan ee doorashada, oo ay ku jiraan shaqaalaha iyo taariikhda doorashada. Cutubka III waa diiwaan-galinta iyo bixinta kaararka codbixinta doorashada iyo ilaalinta sirta codbixinta. Cutubka IV wuxuu qeexayaa shuruuda musharrixiinta iyo ololaha doorashada, halka Cutubka V uu yahay diyaargaroowga doorashada, agabka doorashada iyo diyaarinta goobaha codbixinta. Cutubka VI wuxuu tilmaamayaa tirinta codadka iyo duridda natiijada iyo ku dhawaaqidda natiijada kama danbaysta ah halka Cutubka VII uu ka faaloonayo qodobada kala duwan oo la xiriira doorashooyinka.

3- Sooyaalka taariikheed ee shuruucda Doorashooyinka Qaranka

Ugu horreyntii waxaa mudan in la tilmaamo in dastuurkii 1960 oo ahaa Dastuurkii ugu horreyay ee Soomaaliya yeelato xuriyadii kadib uu yahay isha 1aad ama sharcigii ugu horreeyay ee nidaaminaayo arrimo la xiriira Doorashooyinka xuriyaddi kadib, tusaale waxaan u soo qaada karnaa qoddobada kala ah 8, 12, 52, 70 ee Dastuurkii 1960, oo dhammaantood siyaabo kala duwan ugu ka hadlaayo doorasho.[1]
Qoddobadaan dastuuriga ah ayaa saldhig u ahaa dhammaan shuruucda Doorashooyinka la xiriita ee Soomaaliya laga sameeyay.

Marka aan ka soo tagno qoddobada ku jira Dastuurka ee aan soo tilmaannay lana xiriira arrimaha Doorashooyinka , waxaan dhihi karnaa Soomaaliya markii ay Xuriyadda qaadatay kadib, waxay samaysay shuruuc kala duwan ee doorashada gaar u ah , haddii ay ahaan lahayd Doorashooyinka siyaasadda sida kuwa madaxwaynaha iyo Barlamaan ama Doorashooyinka dowladaha hoose. Sharcigii ugu horreyay ee doorasho gaar u ah ee Soomaaliya yeelato wuxuu ahaa sharci Lr.19 ee 14 August 1963, oo ka hadlaayay Doorashooyinka Dowladaha Hoose (local councils election)[2]
Sharcigii labaad ee Soomaaliya yeelato kuna saabsan doorashooyin isna wuxuu soobaxay hal sano kadib wuxuuna ku saabsanaa Doorashooyinka siyaasadda oo loo la jeedo Doorashooyinka xubnaha Barlamaanka iyo Doorashooyinka Madaxwaynaha.[3] Kadibna labadaan sharci waxaa waxkabadal lagu sameyay

[1] Qodobka 8aad wuxuu ku saabsan yahay xaqa muwaadinku u leeyahay in uu codeeyo, 12 wuxuu ku saabsan yahay xaqa ka qaybgalka siyaasadda, 52 wuxuu ku saabsan yahay doorashada xubnaha barlamaanka halka qodobka 70aad uu ku saabsan yahay doorashada madaxwaynaha.
[2] Fiiri sharci NO: 19 ee 14 August 1963,kuna saabsan doorashooyinka dowladaha hoose
[3] Fiiri Sharci No:4 ee 22 janaayo 1964.

1968, laguna mideeyay hal sharci oo lagu magacaabo Sharciga Doorashooyinka siyaasadda iyo dowladaha hoose ee Sharci Lr13 ee June 1968.[4]

Shuruucdaan gaarka ah ee aan soo tilmaanay waa shuruucdii ugu horreysay ee la xiriirta Doorashooyinka ee Soomaaliya yeelato xuriyyadii kadib, shuruucdaan waxay ku saabsaneed laba nooc oo doorasho oo kala ah:

A- Doorashooyinka Dowlada Hoose

B- Doorashooyinka Siyaasadda.[5]

4- Shuruucda xiriirka la leh Hindise-sharciyeedka Doorashooyinka Qaranka

Waxaa jirto shuruuc kala duwan oo xiriir toos ah la leh sharciga Doorashooyinka oo ay lama huraan tahay in marka la sameynaayo hindise-Sharciyeedka Doorashooyinka isha lagu haayo si aan ugu yaraan loo soo saarin shuruuc is khilaafsan, shuruucdaas waxaa ugu muhimsan kuwan hoos ku xusan;

- **Dastuurka Federaalka KMG**

Dastuurku waa sharciga ugu muhimsan ee hadda jira ee nidaaminaayo arrimaha Doorashooyinka , cutubka 4aad ee Dastuukua ee ka hadlaayo matalaadda shacabka gaar ahaan qaybtiisa labaad ayaa si guud uga hadlaysa arrimaha la xiriira Doorashooyinka iyo xisbiyada siyaasadda, sidoo kale qodobka 22aad ee isla Dastuurku wuxuu ka hadlayaa xaqa ka qaybgalka siyaasadda, waxaa kale oo jiro qoddobo kale oo dastuuri ah oo iyana la xiriira Doorashooyinka sida qodobka 58aad ee ku saabsan Doorashooyinka xubnaha Barlamaanka, iyo qoddobka 89aad ee isna ka hadlaaya Doorashada Madaxwaynaha.

[4] Ibraahim Hashi Jama: Somaliland Electoral laws, PG;25
[5] http://www.somalilandlaw.com/electoral_laws.html

Maadaama uu Dastuurku ka hadlaayo mabaadi' guud oo la xiriirta Doorashooyinka sharci kasta oo la xiriira doorasho waa in uusan khilaafin Dastuurka maadaama aan ogosoonnahay in dastuurku uu yahay sharciga ugu sarreeya ee dalka isla markaana uusan jiri Karin sharci khilaafi kara sida uu jiddeynaayo qodobka 4aad ee Dastuurku.[6]

- **Sharciga Dhisidda Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka**

  Sharciga Dhisidda Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka, Sharci Lr.4 ee 02/04/2015, waa sharci muhiim ah oo nidaaminaayo shaqada iyo waajibaadka Guddiga Doorashooyinka Madaxabannaan ee Qaranka, arrimaha ugu muhimsan ee sharcigaan uu si fiican u qeexaayo waxaa ka mid ah xilalka iyo waajibaadka guddiga, sidaa awgeed hindise-sharciyeedka Doorashooyinka qaranku waa in uusan khilaafsanen sharcigaan sidoo kalana waa in uusan ku soo celcelin arrimo hore si fiican loogu nidaamiyey sharcigaan.[7]

- **Sharciga Axsaabta Siyaasadda**

  Sharciga Axsaabta Siyaasadda ee sharci Lr.19/ee 27/06/2016, wuxuu ka mid yahay shuruucda muhiimka ah ee la xiriirta siyaasadda si gaar ahna saameyn ugu leh arrimaha Doorashooyinka, sharcigaan wuxuu si gaar ah u nidaaminayaa dhowr arrimood oo xiriir la leh Doorashooyinka sida:

  A- Xaqa ka qay-galka siyaasadda

  B- Diiwaangelinta Axsaabta Siyaasadda

  T- Hannaanka Xulidda Murashaxa Xisbiga uga qayb-galaayo tartanka doorashada .

[6] Fiiri qoddobada 22aad, 43aad, 58aad , 89aad iyo 4aad ee Dastuurka sida KMG loom ansixiyay Augusto 1/ 2012

[7] Qoddobka 14aad ee Sharcigaan ayaa si qoto dheer u sheegaaya waajibaadka iyo awoodaha guddiga.

Sidaa darteed sharci kasta oo nidaaminaayo arrimaha la xiriira kuwa lagu nidaamiyay sharciga Axsaabta Siyaasadda waa in uusan khilaafin nuxurka qoddobada sharciga Asxaabta Siyaasadda.[8]

Shuruucdaan waa shuruucda ugu muhimsan ee la xiriira arrimaha la doonnaayo in lagu nidaamiyo Hindise-sharciyeedka Doorashooyinka Qaranka, waxaana lama huraan ah in maanka lagu haayo marka la qoraayo Sharciga Doorashooyinka Qaranka laba arrimood oo kala ah:

- In isha lagu haayo shuruucdaan si aan loo soo saarin shruuc iska hor-imaanaysa.
- In aan mar labaad lagu soo celin arrimo ay shuruucdaan si wanaagsan u nidaamiyeen.

5- Hindise-sharciyeedkaan ma waafaqsan yahay Dastuurka Federallka ee sida KMG ah loo ansixiyay?

Ugu horrayntii waxaan isku dayi donna in aan si kooban uga jawaabo su'aashaan ah hindise-sharciyeedkaan ma waafaqsan yahay Dastuurka Federallka ee sida KMG ah loo ansixiyay?

Sida muuqata hindise -sharciyeedkaan waxaa ku jira qodobo kala gedisan oo qaarkood ay Dastuurka si toos ah ugu horimaanayaan sida qodobka 12aad ee hindise sharciyeedkaan oo si toos ah ugu hor imaanaaya qodobka 89aad ee Dastuurka.

Haddii aan si kooban u sharaxnno arrintaan, labada qodob qodobka 89aad ee Dastuurka iyo qodobka 12aad ee hindise sharciyeedka labaduba waxay ka hadlayaan doorashada madaxwaynaha, qodobka dastuuriga ah wuxuu leeyahay

[8] sharci Lr.19/ee 27/06/2016, ee la xiriira axsaabta siyaasadda.

madaxwaynaha waxaa dooranaaya labada gole ee barlamaanka Federaalka soomaaliya , halka qodobka 12aad ee hindise sharciyeedku uu leeyahay,waxaa madaxwayne noqonaaya murashaxa madaxwayne ee xisbigii hela kuraasta aqlabiyadda barlamaanka, sidoo kale qodobka 89aad ee dastuurku wuxuu faah-faahinayaa hannaanka doorashada madaxwaynahaa sida codadka loo baahan yahay iyo wareegyada doorashada, sidaa si ka duwan ayaa qodobka 12aad ee hindise-sharciyeedku u faah-faahinayaa sida laga leeyaalo haddii la waayo xisbi ku guuleysta aqlabiyadda barlamaanka.

Halkaas waxaa nooga muuqanaaya in qodobka 12aad ee hindise -sharciyeedka doorashooyinka uu si toos ah u khilaafsan yahay qodobka 89aad ee Dastuurka. Inta aanan qodobkaan ka bixin waxaa is waydiin mudan ma jiraa caalamka madaxwayne laga soo doorto hannaanka uu tilmaamayo qodobka 12aad ee hindise sharciyeedka? Waxaa muuqato in doorashadii madaxwaynaha lagu qalday hannaanka uu ku yimaado wasiirka 1aad ee wadamada ku dhaqmo nimaadka barlamaaniga ah.

Sidoo kale hindise- sharciyeedka wuxuu si dadban u khilaafsan yahay qodobka 72aad ee Dastuurka waayo wuxuu xusayaa in nimaadka qaybinta kuraasta aqalka sare lagu soo saari doono xeer gaar ah, waxaa muuqato in hindise-sharciyeedku uu khilaafay qodobka oo ka hadlaayo tirade iyo hannaanka qaybinta kuraasta aqalka sare, sidoo kalna uu meel cad saari waayay qaybinta kuraasta aqalka sare arrintaas oo keentay in uu u xawilo sharci gaar oo kale.[9]

6- Hindise-sharciyeedku ma leeyahay tayadii sharci ee loo baahnaa?

Ka sokow cillada aan soo tilmaannay ee ah in hindise-sharciyeedku uusan waafaqsanayn Dastuurka waxaa is waydiin mudan Su’aasha ah hindise-sharciyeedku ma leeyahay tayadii sharci ee loo baahnaa , marka aan si fiican u

[9] Fiiri qoddobada 89aad iyo 72aad ee Dastuurka FKMG iyo qoddobka 12aad hindise-sharciyeedka

eegno nuxurka hindise -sharciyeedkaan waxaan dhihi karnaa malaha tayadii looga baahnaa sharci muhiim ah sida sharciga doorashooyinka qaranka oo kale sababaha soo socdo awgood:

Qodobka 4aad ee hindise-sharciyeedkaan waxaa lagu sheegay in ujeeddoyinka sharcigaan ay ka midyihiin in la caddeeyo awoodaha iyo waajibaadka guddiga doorashooyinka qaranka, annaga oo og in waajibaadka iyo awoodaha guddiga lagu faah-faahiyay sharci NO: 4 ee 2/04/2015, ee ku saabsan dhismaha guddiga madaxabanana ee doorashooyinka qaranka.

Sidoo kale qodobada 6aad, 7aad, 8aad , 9aad iyo 10aad ee hindise sharciyeedkaan waa isla qodobada 7aad, 14aad iyo 17aad ee NO: 4 ee 2/04/2015, ee ku saabsan dhismaha guddiga madaxabanana ee doorashooyinka qaranka.Labadaan arrimood waxay muujinayaan in sharcigaan qodoba badan oo ka mid ah ay yihiin isla qoddobadii sharci NO: 4 ee 2/04/2015, oo marlabaad lagu soo celiyay.

Sharcigaan ma nimaaminaayo arrimo ay ka midyihiin, qaabka diiwaan gelinta ciidamada qalabka sida ee joogo furumaha, dadka soomaaliyeed ee ku nool dalka dibadiisa iyo ergooyinka dibloomasiyadeed ee ka shaqeeya safaaraha iyo qunsuliyadaha aan ku leennahay dalka dibadiisa iyo qaabka ay u coddaynaayaan .

Qodobka 53aad ee ku saabsan dacwadaha la xiriira natiijada doorashooyinka, ma cadda in ay kala duwan yihiin iyo inkale dacwadaha laxiriira murannada ka dhasha doorashooyinka xubnaha laba aqal iyo murannada ka dhasha doorashada madaxwaynaha.[10]

7- Saameeyska siyaasadeed ee Hindisa Sharciyeedka

Hindise Sharciyeedka uu ansixiyay Golaha Wasiiradda wuxuu abuuray muran iyo shaki laga qabo in uu dareeqa u xaarayo muddo kororsi, iyadoo qodobka 56aad ee

[10] Fiiri Qodobada 14aad iyo 17aad ee NO: 4 ee 2/04/2015

Hindisha uu leeyahya hadii ay timaado duruufo adag waxaa xilka sii haynaya Baarlamaanka iyo Madexweynaha inta duruuftaas laga gudbayo.

Waa arrin la fahmi karo in mucaaradku ka didaan mudo kororsigaas balse shacabka iyo beesha caalamkuba ma soo dhawaynayaan doorasha danbe oo dadban oo ku dhisn awood qaybsiga beelaha ee 4.5 kaas oo dalka aan waxba ku soo kordhin, waa laga ma maarmaan in doorashooyin guug ka qabsoomaan dalka si looga gudbo is jiid jiidka siyaasadeed ee hareeyay dalka.

8- Gunaanad

Waxaa la qabtay Doorashoyinkii dadbanaa dhamaadka 2016-ka iyo bilowgii 2017 in waxayna ka dhaceen dhmaan xarumaha Dowlad Goboleedyada, marka laga reebo Soomaalilaan, taas oo ku dhawaaqay in ka go'day Soomaaliya inteeda kale 1991, waxay ahayd doorasho ka hormarsan tii 2012 oo oday dhaqameedku soo xulayay xildhibaanka, waxay ahayd talaabo horay loo qaaday oo geedi socodka dimiquraadiyada dalka, sharciga doorashooyinka Qaranku waa in uu sii hormariyaa horukacii la sameeyayay sanadihii danbe uuna noqdaa mid la jaanqaadaya baahida xiliga iyo filitaanka shacabka lagana ilaaliyo is daba marinta iyo ku shubasho, sidoo kale laaluushka iyo faragalinta shisheeye.

Dadka sida dhw ula socday Xaaladda dalka waxay aaminsan yihiin in doorashada soo socota ay isbedel ka horseedi karto Soomaaliya, iyadoo uu jiro hardan iyo loolan adag oo u dhexeeye kooxaha fikirka isku haya iyo kuwa isku haya dano qabiil.

Si kastaba ha ahaatee, waa in la garoowsdaa in rajada laga qabo in doorashadu ku dhacdo waqtigeedii ay tahay arin bogaadin mudan balse aysan suuragal ka ahayn dalka xiligaan, geeddi-socodka siyaasadeed waa in uu ahaadaa mid daahfurnaan, caddaaladda iyo waqtiyada doorashooyinka la ilaaliyaa waxay ku imaan kartaa

Sabir, dulqaad iyo iskaashiga dhex mara dhamaan dhinacyada siyaasadda ku hardamaya. Waxaa la rajeynayaa in hadafka la doonayo doorashooyinku in lagu gaaro isbeddel siyaasadeed oo qaangaar ah, oo soo saaraya hoggaan awood u leh helitaanka amni, xasillooni iyo koritaanka dhaqaalaha.

9- Talooyin

Daraasadaan waxay iftiiminaysaa cilladaha ugu muhimsan ee uu leeyahay Hindise-sharciyeedka doorashooyinka Qaranka ee ay ansixiyeen Golaha Wasiirada Federallka Soomaaliya, cilladahaas oo ay ka mid yihiin in uusan waafaqsanayn Dastuurka FKMG, iyo sidoo kale in qodobadiisa inta badan ay yihiin shuruuc horay u jirtay oo sideedii loo soo miin-guuriyay.

Daraasaddu waxay soo jeedinaynaa arrimahaan hoos ku xusan:

A- in laga saaro qoddobada ha soo horjeedda Dastuurka

B- in laga saaro arrimaha lagu Nimaadiyay shruucda kale

T- in Hindise-Sharciyeedka la geliyo latasho dadwayne (public consultation) maamaadu uu yahay sharci Muhiim ah

J- in laba aqal ee Barlamaanku ay si wanaagsan u geliyaan dadaal xoogan sixidda cilladaha hindise-sharciyeedka.

Ugu dambayntii waxaan Rajaynayaa in qormadaan ay wax ka tari doonto cilladaha hindise-sharciyeedku leeyahay lana sixi doono.

10- Tixraacyada Daraasadda :

Tixraacyada ugu muhimsan ee qormadaan waa kuwan hoos ku qoran:

1. Dastuurka Federalka KMG ee 1/8/2012
2. Dastuurka Soomaaliya ee 1960
3. Sharci NO: 19 ee 14 August 1963,kuna saabsan doorashooyinka dowladaha hoose
4. Sharci No:4 ee 22 janaayo 1964, eek u saabsan Doorashooyinka siyaasadda
5. Sharciga Doorashooyinka siyaasadda iyo dowladaha hoose ee Sharci Lr13 ee June 1968.
6. Sharciga Dhisidda Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka, Sharci Lr.4 ee 02/04/2015
7. Sharciga Axsaabta Siyaasadda ee sharci Lr.19/ee 27/06/2016
8. Ibraahim Hashi Jama: Somaliland Electoral laws
9. https://www.dohainstitute.org/ar/lists/ACRPS-PDFDocumentLibrary/document_3A130184.pdf
10. http://www.somalilandlaw.com/electoral_laws.html